UNITED NATIONS NATIONS UNIES

Office of the Humanitarian Coordinator for Somalia

17 Febraayo 2006

Warqad furan oo ku socotal Hogaamiyayaasha Siyaasadda iyo Maleeshiyooyinka, Odayaasha, iyo Wakiilada Bulshada

Waxaan jeclaan lahaa in aan halkaan idin ku xasuusiyo dhibaatada abaarta oo sida aad la socotaan dhawaanahaanba ku fideysay qaybo ka mid ah Soomaaliya taasoo sii culaysisay xaaladdii bani aadanimo ee ba'nayd ee wadanka ka jirtay. Anigoo ah Isuduwaha Gargaarka Baniaadninimo ee Soomaaliya, kaashanayana idinkoo ah wakiilada Soomaalida, waxaan masuul ka ahay isuduwidda gargaarka iyo deeqaha beesha caalamka, iyo waliba xaqiijinta in kaalmadu ay waqtiga ku haboon ku gaarto kuwa sida aadka ah ugu baahan waqtiga ugu dhaqsaha badan uguna haboon ee suurto galka ah. Waxaan kaloo masuul ka ahay ammaanka iyo nabadgalyada dhammaan shaqaalaha UNka – iyo hantidooda – kuwaasoo u xilsaaran in ay gaarsiiyaan kaalmada ilaaliyaanna xuquuqda dhammaan dadka Soomaaliyeed ee tabaalaysan.

Soomaaliya waxaa soo food saartay abaartii ugu xumayd muddo ka badan toban sano. Ayadoo ay sababtay waayitaanka saddex xilli roobaad oo isku xigta, in ka badan laba milyan oo Soomaali ah ayaa waqtigan u baahan kaalmo deg-deg ah. Tiradaan waxaa ku jira ilaa iyo 400,000 oo dadka barakacay ah kuwaasoo muddo intii ahba ka soo barakacay deegaamadii ay ka soo uskameen sababo la xiriira nabadgalyo la'aan isdaba jooga iyo/ama xaalado aan caadi ahayn oo la xiriira khataro deegaanka dabiiciga ah. Dayrtii 2005 gebi ahaanba lagama helin koonfurta Soomaaliya, ilaa iyo 1.4 milyan oo dadka ku noo gobolada Gedo, Jubada Dhexe iyo Hoose, iyo Baay iyo Bakool ayaa dareemaya saameynteeda ugu khatarsan. Qaybo ka mid ah meelahaan ayaa muddo la ildaraa xaalad bani'aadanimo oo qallafsan oo raagtay.

Sii yaraanshada aadka ah ee biyaha iyo hantida ayaa saamaysay dhammaanba hanaanka nolosha: xoolaleyda iyo beeralayda wabiyada. Wax-soo-saarka miraha ayaa gaaray heerkii ugu hooseeyey muddo toban sano ah. Yaraanshaha biyaha iyo helitaanka daaqa ayaa sababay iska hor-imaad ka dhashay biyaha iyo baadka oo meelaha qaarkoodna qoysasku ku bixiyaan 70-80% dakhligooda in ay ku gataan biyo. Dad badan – gaar ahaan dumarka iyo carruurta – waxay u guuraan xarumaha magaalooyinka ayagoo raadinaya kaalmo. Dhimashada lo'da meelaha ugu xumi waxay gaartay 20-30%, waxayna gaari kartaa 80% bisha Abriil. Xoolo dhaqatadu waxay gowracaan neefafka tabarta daran iyo kuwa yar-yar oo ay ku jiraan kuwa dhiciska ah si ay u badbaadiyaan hantidooda. Qiimaha xoolaha nool ayaa aad hoos ugu dhacay halka cuntadu ay si weyn kor ugu kacay. Nafaqo-xumida ayaa gaartay heer aanu damiirku qaadankarin oo gaaray 25% meelo ka mid ah gobolka Gedo, halka iyana la sheegay in ay jadeeco ka dillaacday meelo badan.

Marka la eego in roobabka Guga aan la filayn Abriil ka hor, waxaa la filayaa in xaaladda abaartu ay sii xumaato marka uu xilliga Jiilaalku sii socdaba. Xaaladda waqooyiga Gedo iyo meelaha wabiyada ee gobolada Jubooyinka waxay mareysaa meel haddii xaaladdu sii xumaato, ay dillaacdo abaar ba'an. Rajada laga qabo in ay xaaladdu ka soo rayso waxay si weyn ugu xirantahay habsamida iyo waqtiga laga jawaabo xaaladda deg-degga ah, iyo taageerada laga helo beesha

7th Floor, Kalson Towers, Crescent Street, off Parklands Road, P.O. Box 28832, 00200 Nairobi, Kenya
Tel No: (254-20) 3754150-5; Fax No: (254-20) 3754156

caalamka si ay ugu suurta gasho ururada samafalka in ay ka jawaabaan. Balse, si kastaba ha ahaatee, waxaa xuddun u ah ilaa iyo xadka la kari karo in la gaaro lana gaarsiiyo kaalmada dadka tabaalaysan, iyo waaritaanka gaaritaankaan.

Qaarkiin waxay mar horaba ila wadaageen dareenka arintaan iyada ah; in waqtian adag, muhimaddu ay ahaato sidii looga gudbi lahaa dhibaatada Soomaalida ku habsatay oo carqaladeysay noloshooda anay burburisay abaartu. Waxaan mar horaba idin kala shaqaynaynay sidii kaalmadu u gaari lahayd dadka u baahan. Isla mar ahaantaasna wax badan ayaa dhiman in la qabto. Mar haddaad tihiin hogaamiyayaasha iyo wakiillada Soomalida, waxaa waajib idin ku ah ilaalinta mabaadiida aasaasiga ah ee xanibaad la'aanta gargaarka aadaminimada iyo sugidda ammaanka dariiqooyinka uu gargaaku marayo. Sidaa daraadeed waxaan idiin soo jeedinayaa hoggaankiinna in aad ku qaadaan talaabooyinka muhiimka u ah arintaan.

Waxaan hadda kala shaqaynaynaa maamulada deegaanada iyo hogaamiyayaasha bulshada u hogaansanaanta qodobo dhowr ah ee "mabaa'diida hogaamisa gaaritaanka aan xanibnayn iyo ilaalinta xuquuqda dadka u baahan kaalmo bani'aadaminimo iyo xuquuq ilaalinta". Waxaan jeclaan lahaa in aan halkaan idin kula wadaago qaar ka mid ah mabaadiida furaha ah Qaramada Midoobay oo Soomaliya qayb ka tahay, aanna ku adkaysanayso.

Tan ugu muhiimsan, waxaan idiin kugu yeerayaa in aad mar kale caddaysaan balanqaadkiinna iyo masuuliyaddiinna in aad si aan xannibaad lahayn u fududayn doontaan gaarsiinta gargaarka bani'aadanimo dadka hoos yimaada maamulkiina iyo halkii suurtogal dadweynaha ku nool xuduudihiina. Taasoo ay ku jiraan dhammaan gaadiidka sida gargaarka aadaminimada iyo diyaaradaha ee soo galaya ama ka baxaya meelaha hoos yimaada maamulkiina.

Waxaan idinku dhiirigalinayaa in aad si buuxda ugala shaqaysaan QM in la xaqiijiyo ammaanka iyo nabadgalyada shaqaalaha UNta oo dhan iyo hantidoodaba. Tan waxaa kamid ah ilaalinta buuxda ee lihida Qaramada Midoobay, Gaadiidka, Qalabka iyo Safarrada iyo weliba ammaanka Garoommada diyaaradaha iyo Jidadka ay isticmaalaan Qaramada Midoobay. Waa inaan la qashqashaain shaqaalaha QM marka ay joogaan deegaannada maamulkiina hoos yimaada, hadday shaqo ku jiraan iyo haddii kaleba.

Wixii ku saabsan sahamada, la-tashiyada ama bixinta kaalmada iyo xuquuq dhowridda, waxaan isku halaynaynaa masuuliyaddiina maamul in aad ku fududaysaan gaaritaanka dad kasta oo ku nool meelaha hoos yimaada maamulkiina iyo in dadweynaha aad ka dhaadhicsaan in gargaarka aadaminimadu uu ku salaysanyahay hadba baahida jirta, waxaana dhici karta in dad gaar ah oo xaalad gaar ah ku sugan la siiyo. Waxaan isku halaynaynaa wadashaqayntiinna in uu maamulku hay'adaha kaalmada bixiya ku caawinayo abaabulka dadweynaha si habsami loogu fuliyo barnaamijyada.

Fulinta waajibaadyadaani waxay yeelan kartaa caqabado, gaar ahaan meelaha xaaladaha cakirani ka jiraan sida Somaaliya oo kale. Saasoo ay tahay mabaadiidaani waxay u jiraan dhawridda xuquuqda iyo badbaadada nolosha waana arrimo aan laga wada xaajoon karin. ha

Bulshooyin badan ayaa sameeyey shaqo lataaban karo oo ay ku abuureen dhaqdhaqaaqyo ay isku caawinayaa isna siiya kaalmo markii ay karaan. Qaramada midoobay iyo hay'adaha kale ee samafalku waxay u caawinayaan arintaan si alaale iyo sidii ay kari karaan. Meelo badan oo kamid ah Soomaaliya, arintu sikastaba ha ahaatee, waxaa naga xaniba in aan arintaan fulinno dilaacitaanka dagaalada, amaandarada raagta am falalka danaystayaasha awgood La'aanta

7th Floor, Kalson Towers, Crescent Street, off Parklands Road, P.O. Box 28832, 00200 Nairobi, Kenya
Tel No: (254-20) 3754150-5; Fax No: (254-20) 3754156

gaaritaanka waara ee sanooyinka qaata iyo xanibaadda ka jirta meelaha laga shaqaynayo ayaa waxay tahahay sababta weyn ee sameeya noolaansha dadka. Sidaa daraadeed waxaa waajib idin ku ah, mar haddaad tihiin masuuliyiinta bulshadiinna, in aad samaysaan wax kasta oo aad awooddaan in aad dhamaysaan colaadda, abuurtaan dib u heshiisiin, aadna xakamaysaan maleeshiyada si aad u abuurtaan xaalad ku haboon dhaqdshaqaa waara oo xor ah, iyo waliba dhexdhexaadnimada iyo madaxbanaanida howlgalada aadaminimada.

Waxaan ku kalsoonahay in maamulada Soomaalida iyo bulshaduba, QM iyo ha'adaha kale ee gargaarkuba ay wada jir u shaqayn karaan si ay xal ugu helaan baahida sii kordheysa ee ka dhalatay abaarta. Waxaan si aad ah ugu dadaaleynaa in aanu kaalmo ka helo beesha caalamka si aanu kor ugu qaadno awoodayada wax qabad. Tani, si kastaba, ha ahaatee, wax badan ma qaban karto haddii aanaan wax ka gargaari karin goobaha dhibtu ka jirto. Waxaanu idiinka baahanahay balanqaadkiinna oo adag ee in aad ixtiraamaysaan waajibaadkiinna damiireed ee in aad fududaysaan kaalmada loo fidinayo dadkiinna oo iyadu ugu danbaysta idin kula xisaabtamaysa.

Anigu dhawaan ayaan Soomaaliya ka tagayaa si aan shaqo kale u qabto laakiin asxaabteyda nidaamka QM waxay diyaar u yihiin in ay arintaan mar walba idin la sii wadaan. Waqtigii afarta sano ahayd ee aan uga shaqaynayey Soomaaliya Xiriiriyaha Gargaarka baniaadninimo ee Soomaaliya, waxaan marwalba ku faraxsanaa kuna kalsamaa wada shaqaynteenna, taas oo aan hubo in ay sii socon doonto mustaqbalka.

Maxwell Gaylard
Isuduwaha Gargaarka ee Soomaaliya

Cc: Hay'adah QM ee Soomaaliya
Saxaafadda caalamiga ah iyo kuwa wadaniga ah
Hay'adda Isuduwidda Gargaarka ee Soomaaliya

7th Floor, Kalson Towers, Crescent Street, off Parklands Road, P.O. Box 28832, 00200 Nairobi, Kenya
Tel No: (254-20) 3754150-5; Fax No: (254-20) 3754156